

Kugu socota adigaaga xagaaga ilmo ku dhali doonta Skåne

Ku soo dhawaw waaxaheenna dhalmada ee Helsingborg, Lund, Malmö, Ystad iyo Kristianstad. Waan idin daryeeleynaa adiga iyo ilmahaaga, waxaanna ku siineynaa taageerada aad u baahan tahay si aad u hesho waayo-aragnimo dhalmo tan ugu wanaagsan ee suurta galka, iyo dhalmo ammaan ah oo badbaado leh.

Macluumaad muhiim ah xagaaga hortiiisa

Dhammaan waaxaha dhalmada ee Skåne waxaa saameyn doona umuliso yari jiri xagaaga gudihiiisa. Waxay taasi keenaysaa in qolal dhalmo oo yar ay furnaan doonaan inta lagu jiro xilliga fasaxa shaqada.

Waaxaha dhalmada ee Skåne waxay leeyihiin iskaashi dhaw si ay dhammaan dumarka uurka lihi xitaa xagaaga gudihiiisa u helaan dhalmo wanaagsan oo amni iyo badbaado leh. Dhammaan haweenka wax dhalaya iyo carruurta markaas dhalata waxay heli doonaan daryeelka ay u baahanyihiin, laakiin laga yaabee inaysan ku helin meeshi la qorsheeyay iyo meeshi uu qofku rabay.

Noo soo wac marka la gaaro waqtigaaga

Xagaaga aadbey muhiim usii tahay inaad wacdo waaxda dhalmada ee aad rabto inaad ku dhasho **inta aadan aadin ka hor**, si aan kuugu qaabili karno sida ugu wanaagsan ee suurta galka ah. Waxaan kaa caawineynaa in la qiimeeyo inta aad ka gaartay hawsha dhalmada, waxaan qorsheyneynaa goorta ay tahay inaad halkan timaado, waxaanna hubineynaa in lagu helo boos.

Haddii ay buuxdo waaxdi dhalmada ee aad doneysay, waxaa beddelkeeda boos lagaa siin karaa isbitaal kale. Waan kaa caawineynaa in lagu helo boos.

Malmö iyo Lund: 0771-11 18 88

Ystad: 0411-99 52 45

Helsingborg: 042-406 22 20

Kristianstad: 044-309 13 21

In ilmo lagu dhalo agteenna

Akhriso sida aad isu diyaarineyso dhalmada ka hor, dhalmadaada, daryeelka ka dambeeya dhalmada iyo xilligii ugu horreeyay ee ilmaha markaas dhasha.

Malmö & Lund



Iskaan-garee koodka QR-ka ama raadi "föda barn" bogga skane.se/sus

Helsingborg




Iskaan-garee koodka QR-ka ama raadi "föda barn" bogga skane.se/helsingborg

Ystad



Iskaan-garee koodka QR-ka ama raadi "föda barn" bogga skane.se/ystad

Kristianstad



Iskaan-garee koodka QR-ka ama raadi "föda barn" bogga skane.se/csk

